

Tusmooyin iyo tayooyin

h&f
hammersmith & fulham

Codsoshada gelitaanka dugsiga hoose
ee Sibtembar 2021



Ka codso barta internet-ka:
**[www.lbhf.gov.uk/
schooladmissions](http://www.lbhf.gov.uk/schooladmissions)**

**Barta aqballaadda internet-ka ee
Pan-London eAdmissions ayaa waxay
furmaysaa 1-da Sibtembar 2020.**

**Haddii cunuggaagu uu dhashey inta u
dhaxeyso 1-da Sibtembar 2016 iyo
31-ka Agoosto 2017, waxaad u
baahan doontaa in aad boos uga
codsato dugsigga hoose (soo-
dhaweynta) ugu dambeyn marka ay
taariikhdu tahay 150ka Jannaayo
2021.**

Faa'iidooyinka ay leedahay codsashada barta internet-ka ah

- Waa wax dhaqso ah oo sahlan in la sameeyo
- Waxaad ka soo codsan kartaa goob kasta oo internet-ka laga soo gali karo 24 saac maalintii, toddobo maalmood toddobaadkii ilaa iyo inta laga gaarayo taariikhda xiritaanka oo ah **15-ka Jannaayo 2021**.
- Dib ayaad u soo geli kartaa si aad u beddesho ama u tirtirto iskuullada dookhyadaada ah ilaa iyo inta laga gaarayo 11.59 fiidnimo (pm) ee taariikhda la xirayo.
- Waxaad ku diiwaangelin kartaa lambarkaaga telefoonka gacanta si aad u hesho digniino xusuusin ah.
- Waxaad si otomaatik ah u heli doontaa limayl xaqiijin ah, oo la socda lambarka tixraaca codsigaaga, marka aad soo gudbiso codsigaaga.
- Waxaad awooddaa in aad ku soo lifaaqdo dokumentiyo dheeraad ah.
- Inta lagu guda jiro fiidka **16-ka Abriil 2021**, waxaa lagu soo diri doonaa iimayl kuu sheegaya in natiijadaadu ay soo baxday oo la heli karo.
- Marka aad hesho iimaylkan, waxaad geli kartaa barta internet-ka Pan-London eAdmissions si aad u oggolaato ama u diiddo soo-jeedintaada.

Haddii aad doorbidayso in aad buuxiso foomka codsiga warqadda ah, fadlan la xiriir kooxda aqballaadda (faahfaahinnada xiriirka waxaa laga heli karaa xagga dambe ee buugyarahan).

Halka laga helo macluumaadka aad u baahan tahay

Buugyarahan wuxuu ku siinayaa xoogaa tusmooyin iyo tayoooyin aasaasi ah oo ku saabsan hannaanka codsiga wuxuunna ku tusinayaa halka laga helo macluumaad aad iyo aad u faahfaahsan.

Buugyaraha aqballaadda oo dhammeystiran ee Hammersmith iyo Fulham waxaa bartan internet-ka laga heli doonaa laga bilaabo bilowga bisha Sibtembar: www.lbhf.gov.uk/schooladmissions

Buugyaraha ayaa si faahfaahsan u sharxaaya hannaanka codsiga wuxuunna dhigayaa shuruudaha aqballaadda ee dugsii kasta ee ku yaalla degaanka Hammersmith iyo Fulham.

Halka ay suuragal tahay, waalidiinta/daryeelayaasha waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay macluumaadka ka raadiyaan barta internet-ka. Barta internet-ka ee kor ku xusan waxay bixisaa xiriirrada ama linkiyada barta codsiga eAdmissions iyo baraha internet-ka ee iskuul kasta, kuwaas oo ku siin doona macluumaad faahfaahsan.

Dhammaan xiriirrada aad u baahan tahay waxaa laga heli karaa buugyaraha maamulka degaanka ay iskuullada ku yaallaan.



Baaris ku samee, baaris ku samee, baaris ku samee!

Haddii aadan horey sidaa u sameyn, waa in aad raadisaa iskuullada aad daneynayso in aad codsato. Waxaad sidaan sameyn kartaa adiga oo xaqiijinaya in aad akhriso shuruudaha aqballaadda si aad u oggaato haddii cunuggaagu ay u badan tahay in meel laga siiyo, waxaadna eegtaa qaadashooyinka sannadkii hore.

Booqo iskuullada aad daneynayso waxaadna sameysaa liiska su'aalo aad jeclaan lahayd in aad weyddiiso ka hor inta aadan tagin. Kooxda aqballaadda ayaa sidoo kale awoodda in ay ku siiso talo ku saabsan qaadashooyinkii sannadkii hore.

Waa in aad dareen gaar ah u yeelataa shuruudaha aqballaadda ee iskuullada hela codsiyada ugu tirada badan, waxaadna buugyaraha aqballaadda ka eegtaa sida boosaska sannadkii hore loo bixiyay. Macluumaadkan waa in uu ku siiyaa tilmaanta sida ay u badan tahay in cunuggaaga boos laga siiyo. Waxaa lagu siiyaa hage ahaan oo keliya wayna isbeddeli karaan sannad kasta iyada oo ku xiran tirada codsiyada la helay.

Ma jiro wax dammaanad qaadaya in cunuggaaga boos laga siin doono iskuulka degaankaaga; tani waxay ku xirnaan doontaa inta ay le'eg yihiin tirada codsiyada loo helay boosaska la heli karo.

Tusmooyin iyo tayooyin codsashada

Isbar ama isfahamsii shuruudaha aqballaadda iskuullada

Inta aad ku guda jirto baaritaankaaga, waxaad u baahan doontaa in aad akhriso shuruudaha aqballaadda iskuulka/iskuullada ee aad doonayso in aad codsato.

Haddii xoogaa tusaalooyin ah lagaa siiyo waxa la eego:

- Iskuullada kaniisadaha waxay mudnaan siinayaan codsadaayaasha muujin kara in ay ku dhaqmaan caqiidada ama diintooda haddii ay qabtaan codsiyo ka badan boosaska la heli karo.
- Cunuggaaga waxaa laga yaabaa in uu dhigto dugsiga xannaanada carruurta yaryar, waxaanna laga yaaba in aad rabto in uu meeshaasi ku sii negaado, balse waa in aad oggaataa in iskuullada intooda badani in aysan shuruudahoodu mudnaan ku siin carruurta dugsigooda xannaanada.

- Iskuullada oo dhan mudnaan ma siiyaan carruurta walaalaha ah sidaa awgeed waxaad marka hore u baahan doontaa in aad tani eegto.
- Masaafada u dhaxeeyso guriga ilaa iyo iskuulka ayaa inta badan waxaa loo adeegsadaa barbarro jabin, balse waxaa jira iskuullo adeegsada qoondeyn ku nasiibso ah (bakhtiyaa-nasiib ah).
- Iskuullada qaar waxaa ay leeyihiin degaamo ay mudnaanta koowaad siiyaan.

Waxaa jira arrimo loo baahan yahay in aad ka warqabto marka aad go'aaminayso iskuullada la codsanayo.



Waxaad codsan kartaa ilaa iyo lix iskuul oo dookhyadaada ah

Fadlan xusuusnow in aad codsan karto ilaa iyo lix iskuul oo dookhyadaada ah. Xitaa ka-dib marka aad baarto iskuullada oo aadna go'aansato halka aad codsanayso, haddii aad boqolkiiba 100 aad hubto in cunuggaaga boos la siinayo mooyaane (haddii, tusaale ahaan, walaalkiisa ama walaashiisa ay dhigtaan oo tanina ay tahay mudnaansiin ku xusan shuruudaha iskuulka), waa in aadan u qaadan in cunuggaaga boos la siin doono.

Waa in aad sidoo kale tixgelisaa iskuullada kale ee aad ogtahay in aad ka heli doono fursad wanaagsan oo aad boos ku heli doonto. Waxaa jira iskuullo ku yaalla maamullada degaanka deriska ah oo laga yaabo in ay u dhow yihiin cinwaanka gurigaaga waxaanna lagu taliyo in aad sidoo kale tixgeliso iskuulladan.

Magacaabidda iskuullo kale wax saameyn ah kuma yeellan doonto fursadda lagugu siinayo boos aad si aad ah u doorbidayso. Iskuullada laguma wargelinayo dookhyada kale ee aad sameysay, ama booska ay kuugu jiraan.

Ka taxaddar sida aad u kala horumariso dookhyadaada

Dookhyada iskuullada ee aad sameyso si siman ayaa loola dhaqmaa. Tani macnaheedu waa in boos kasta oo aad iskuulka ka gelisid liiska dookhyadaada, in loola dhaqmi doono si la mid ah dhammaan codsiyada kale ee sidoo kale doortay iskuulkaasi –iyada oo aan loo eegayn halka ay iskuulka ka geliyeen liiskooda.

Sababta ay muhiim u tahay in iskuullada loo taxo sida ay ugu kala horreeyaan dookhaaga waa in marka natiijooyinka loo diro kooxda aqballaadda, waxaa laga yaabaa in aan helo soo-jeedimada in ka badan mid ka mid ah dookhyadaada ama iskuullada aad doorbidayso. Maadaama hal soo-jeedin oo keliya la siin karo cunuggaaga, waxaa lagu soo bandhigi karaa iskuulka ugu sarreeya ee suuragalka ah oo laga soo qaatey liiska aad bixisay. Soo-jeedimo kasta ee la sameeya ee meel hoose kaga jira liiskaaga waa lala noqon doonaa waxaanna dib loogu celin doonaa hannaanka.



Ma u baahanahay in aan bixiyo macluumaad dheeraad ah?

Iskuullada (kaniisadda) si iskaa-wax-u-qabso ah lagu caawiyo waxaa ay kaa dooni doonaan in aad buuxiso foomka macluumaadka dheeriga ah (SIF). Foomamka loogu talagalay iskuullada kaniisadda ee degaanka Hammersmith iyo Fulham ayaa waxaa laga heli karaa iskuullada gaarka ah.

Buugyaraha Dugsi Bilaabidda ayaa sheegaya iskuullada ku yaalla degaanka Hammersmith iyo Fulham ee u baahan foomka SIF. Hannanka barta internet-ka ayaa kuu digi doona marka aad geliso dookh kasta ee iskuulka u baahan foomam dheeraad ah in la buuxiyo.

Waa in aad iskuulka u soo celiso foomka SIF iyo dokumentiyo kasta oo kale, sida shahaadooyinka lagu bixiyo xafladda qaadashada diinta Masiixiga, balse sidoo kale xaqiiji in aad soo gudbiso codsiga ama arjiga laftiisa, oo sheegaya iskuulka ku jira liiska iskuullada aad doorbidayso.

Waa in aad codsigaaga ama arjigaaga soo gudbisaa waqtigii loo baahnaa

Waa in aad codsigaaga soo gudbiso ugu dambeyn marka ay taariikhdu tahay **15-ka Jannaayo 2021**. Haddii aad tahay qof deggan degaanka Hammersmith iyo Fulham ma awoodi doonta in aad barta internet-ka ka codsato taariikhdan ka-dib waxaadna u baahan doontaa in aad codsato foom warqad ah.

Haddii aad soo gudbiso foomkaaga codsiga taariikhdan ka-dib adiga oo aan haysan sabab ansax ah oo uu ku soo daahay, codsigaagga ayaa la tixgelin doonaa ka-dib marka la dhammeeyo dhamman kuwa la soo gudbiyay waqtigii loo baahnaa. Tani waxay si weyn u saameyn doontaa fursadihii laguugu soo-jeedin lahaa iskuulka aad doonayso.



Miyaa si shaki la'aan ah la iigu soojeedin doonaa mid ka mid ah dookhyadeyda?

Maya. Si aad u kordhiso fursadahaaga in lagu soojeediyo mid ka mid ah iskuullada aad doorbidayso, waa in aad baarto shuruudaha aqballaadda ee iskuullada aad daneynayso. Buugyaraha aqballaadda dugsiyada hoose waa il wanaagsan oo laga heli karo macluumaad.

Waa in aad ku dartaa ugu yaraan hal iskuul liiskaaga halkaas oo aad si macquul ah u hubto in cunuggaaga uu buuxinayo shuruudaha (tusaale, walaalkiisa ama walaashiisa ayaa horeyba ugu jiray iskuulka ama masaafadaada min guriga ilaa iskuulka ayaa ka dhigan in aad heli lahayd geliyaan sannadihii la soo dhaafay).

Haddii aad rabto talo iyo tusaale dheeraad ah waxaad la hadli kartaa kooxda aqballaadda, ama iskuulka laf ahaantiisa haddii uu yahay iskuul ama akademiyaad iskaa-wax-u-qabso lagu caawiyo. Waxaa ay awoodi doonaan in ay ku siiyaan hagdii ku saabsan suuragalnimada in cunugaaga boos la siiyo iyada oo lagu saleynayo macluumaadka aad bixiso. Suuragal ma ahan in la bixiyo dammaanad qaadka natiijada ka soo bixi doonta codsigaaga/arjigaaga.

Maxaa ku dhacaya doorashooyinkii aan doortay ee aan aniga la ii soo bandhigin?

Dookhyo kasta ee ka hooseeya iskuulka la soojeediya waa lala noqonayaa. Waxaa si otomaatik ah laguugu darayaa liiska sugitaanka ee iskuulka/iskuullada dookha sare ah ee aanan awoodin in ay cunuggaaga u soojeediyaan boos. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay in aad racfaan ka qaadato Guddiga Rafcaanka ee Madax-bannaan oo ka dhan ah go'aanka.

Hase-yeeshee, waxaad u baahan doontaa in aad ka warqabto sharci ahaan, fasallada carruurta yaryar in aysan ka badnaan karin 30, sidaa awgeed waxaa jira sababo aad iyo aad u xaddidan oo lagu taageeri karo racfaan. Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa buugyaraha aqballaadda dugsiyada hoose.

Iskuullada, dugsiyada xannaanada carruurta yaryar iyo xarumaha carruurta yaryar ee ku yaalla degaanka Hammersmith iyo Fulham

Liiska hoos ku taxan waa dugsiyada hoose, dugsiyada xannaanada carruurta yaryar iyo xarunta carruurta yaryar ee degaanka Hammersmith iyo Fulham, oo la isugu kooxeeyay nooca iskuulka ka-dibna sida ay alifba' ahaan ugu kala horreeyaan. Goobta uu ku yaallo iskuul kasta waxaa lagu tilmaamey khariidadda ku taalla bogga 12aad.

Dugsiyada hoose ee bulshada

- 1 Addison Primary School
- 2 Avonmore Primary School
- 3 Brackenbury Primary School
- 4 Flora Gardens Primary School
- 5 Kenmont Primary School
- 6 Melcombe Primary School
- 7 Miles Coverdale Primary School
- 8 Normand Croft Primary School
- 9 Old Oak Primary School
- 10 Sir John Lillie Primary School
- 11 Wendell Park Primary School
- 12 Wormholt Park Primary School

Akademiyaadaha iyo iskuullada Xorta ah

- 13 Ark Bentworth Primary Academy
- 14 Ark Burlington Danes Primary Academy
- 15 Ark Conway Primary Academy
- 16 Ark Swift Primary Academy
- 17 Earl's Court Free School Primary
- 18 Fulham Primary School
- 19 Greenside Primary School
- 20 Langford Primary School
- 21 Queen's Manor Primary School
- 22 Sullivan Primary School
- 23 Thomas's Academy
- 24 West London Free School Primary

Dugsiyada hoose ee iskaa-wax-u-qabso lagu caawiyo

- 25** All Saints C of E Primary School
- 26** Good Shepherd Catholic Primary School
- 27** Holy Cross Catholic Primary School
- 28** John Betts Primary School
- 29** Larmenier and Sacred Heart Catholic Primary School
- 30** St Augustine's Catholic Primary School
- 31** St John XXIII Catholic Primary School
- 32** St John's Walham Green C of E Primary School
- 33** St Mary's Catholic Primary School
- 34** St Paul's C of E Primary School
- 35** St Peter's C of E Primary School
- 36** St Stephen's C of E Primary School
- 37** St Thomas of Canterbury Catholic Primary School
- 38** The London Oratory School – Junior House

Dugsiyada labada luuqadood ku baxa ee iskaa-wax-u-qabso lagu caawiyo

- 39** The Fulham Bilingual – affiliated with Holy Cross Catholic Primary School (goobta 27 ee khariidadda)

Dugsiyada xannaanada carruurta yaryar ee bulshada iyo xarumaha carruurta yaryar

- 40** Bayonne Nursery
- 41** James Lee Nursery School
- 42** Randolph Beresford Early Years Centre
- 43** Vanessa Nursery School

Iskuullada baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah

- 44** Cambridge School (age 11 to 16)
- 45** The TBAP Courtyard Academy (age 5 to 11)
- 46** Jack Tizard School (age 5 to 11)
- 47** Miles Coverdale School Language Impairment Unit (age 5 to 11)
- 48** Queen's Manor Primary School Learning Difficulties Unit (age 5 to 11)
- 49** Queensmill School (age 3 to 19)
- 50** Woodlane High School (age 11 to 16)

Goobta uu ku yaallo iskuul kasta waxaa lagu tilmaamey khariidadda ku taalla bogga 12aad.

Khariidadda maamulka H&F

Furaha:

- Dugsiyada hoose ee bulshada
- Akademiyaaha iyo iskuullada xorta ah
- Dugsiyada hoose ee iskaa-wax-u-qabso
- Iskuullada labada luuqadood iskaa-wax-u-qabso
- Dugsiyada xannaanada iyo xarumaha carruurta yaryar
- Iskuullada baahiyada waxbarashada gaarka ah



© Crown copyright

Dib u soosaaridda aan la oggolaan waxay ku xadgudbaysaa xuquuqda-daabacadda ee u dhowrsan Crown waxayna keeni kartaa dambi ku soo oogid ama dacwad madani ah. L.B. Lr. Shatiga HAMMERSMITH iyo FULHAM LA100019223 2006

Khariidaddan waxay ku saleysan tahay agabka Sahamin Maamul iyada oo oggolaansho laga haysto Sahamin Maamul oo ka wakiil ah Mas'uulka Xafiska Qalabka ee Boqoradda Sharafta leh.

Ka codso barta internet-ka:
**[www.lbhf.gov.uk/
schooladmissions](http://www.lbhf.gov.uk/schooladmissions)**

**Barta aqballaadda internet-ka ee
Pan-London eAdmissions ayaa waxay
furmaysaa 1-da Sibtembar 2020.**

**Haddii cunuggaagu uu dhashey inta u
dhaxeyso 1-da Sibtembar 2016 iyo
31-ka Agoosto 2017, waxaad u
baahan doontaa in aad boos uga
codsato dugsigga hoose (soo-
dhaweynta) ugu dambeyn marka ay
taariikhdu tahay 150ka Jannaayo
2021.**

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah la xiriir:

Kooxda Aqballaadda

3rd Floor, 145-155 King Street, London W6 9XY

Telefoonka: 020 8753 1085 (Isniin ilaa Jimco, 9.00 subaxnimo ilaa 1.00
fiidnimo)

limeylka: school.admissions@lbhf.gov.uk

www.lbhf.gov.uk/schooladmissions

